



# Countywide Planning Policies Development Patterns



King County

## Dulmarka

Cutubka Development Patterns (Qaybaha Hormarinta) ee **Countywide Planning Policies** (CPPs, Xeerarka Qorshaynta Degmada oo Dhan) ayaa haga horumarinta bulshada iyo kobaca shaqada ee deegaannada degmada King ayagoo wax ka qabanaaya goobta, noocyada, naqshada, iyo balaca dhulka la isticmaalaayo.

Cutubka waxaa ku jira xeerarka abuurista aagaga kobaca magaaloyinka, ayadoo diirada la saaraayo magaaloyinka iyo xarumaha, kor loo qaadayo xeeladaha naqshada magaaloyinka si loo abuurto bulshooyin caafimaad leh oo bii'oo wanaagsan, loona difaaco dhulka baadiyaha iyo khayraadka.

Xeerarku waxay maamulaan sida iyo goorta isbadelada lagu samayn karo xadudaha kobaca magaalada, sida higsiyada kobaca loo abuurayo looguna adeegsanaayo isticmaalka dhulka ayadoo lagu sheegaayo qorsheyaal waawayn, qorshayn wadaajir ah iyo habraacyada ka saarida.

## Isbadelada Xeerka

Isbadelkaan lagu samaynaayo cutubka Development Patterns ayaa ku xiraaya qorshaha maxaliga ah higsiyada kobaca tayada iyo tirada ee gobalka – asagoo xaqiijinaaya in higsiyada loo adeegsado qorshayaasha balaaran, oo diirada saaraaya kobacyada xarumaha gobalka, abuurista qaybo cusub oo xarumaha wadanka oo dhan ah, ku xirida xeerarka degmada oo dhan kuwa gobalka ee hormarinada waawayn ee deegaannada miyiga ah, iyo kor u qaadista naqshada balaaran ee magaalada iyo dhismayaasha bii'ada u roon.

Isbadelka ayaa sidoo kale adkaynaaya baahida loo qabo wax ka qabashada sinaanta qorshaynta maxaliga ah iyo hormarinta si loo hubiyo in dadka deegaanka iyo shaqaalaha dhammaan King County ay helaan helitaanka cadaalada ee guryaha, shaqooyinka mushaarka fiican, waxbarasho, dookhyada gaadiidka, iyo nasiino.

Isbadalku waxa uu buuxinayaa duleelada ka jira xeerka ee la xariira helitaanka cunto caafimaad leh, xaqiijinta joogtaynta u dhaxaysa qorshayaasha gaarka ahee degmada iyo kuwa gobalka iyo qorshayaasha degmada oo dhan. Waxay sidoo kale dhiiri gelinaysaa wada shaqayn badan oo dhex marta maamulada maxaliga ah ee Potential Annexation Areas (PAAs, Aaga Dhulka ee La goosan Karo) iyo waafajinta xeerarka CPP la waafajiyoo xeerarka iyo barnaamijyada hagaaya sida aaga kobaca magaalada loo badali karo.

## Saamaynada Isbadelada Xeerka

- Waxay adkaynaysaa hanaanka wada shaqaynta ee loo adeegsaday abuurista Buildable Lands Report (Warbixinta Dhulka La dhisi karo) loona abuurto higsiyada kobaca.
- Waxay qeexaysaa xariirka higsiyada kobaca kala dhexeeya qorshayaasha balaaran, abuurista xariiro adag oo ay la yeelato dhulka la qorsheeyay iyo fikradaha.
- Waxay xog ka bixisaa qorshaha balaaran iyo isbadaladii ugu danbeeyay ee sharciyada, iyo sidoo kale farsamooyinka iyo habraacyada maamulada.
- Waxay dajisaa nidaam loogu astaynaayo musharax Countywide Centers (Xarumaha Degmada oo Dhan) kaasoo loo eegi doono magacaabid rasmi ah isbadalada mustaqbalka ee Qorshaha Balaaran.
- Waxay kobcisaa sinaanta iyo cadaalada bulshada ayadoo aqoonsanaysa meelaha xeerarku ay ku kaladuwan yihiin saamaynta waxayna kor u qaadaysaa helitaanka cadaalada ah ee fursada.
- Waxay cadaynaysaa hormarada cabirada waawayn ee baadiyaha, sida mashruucyada afartiiba hal iyo Fully Contained Communities (Bulshooyinka sida Buuxda loo Xakameeyay), ayaa ah in wax laga qabto.

## Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, faalan iimeel u dir [gmpc@kingcounty.gov](mailto:gmpc@kingcounty.gov) ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

### Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPPwaa taxanayaalka xeerar maamula ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorsheynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaaloyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuurto xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalo kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo [VISION 2050 \(HIGSIGA 2050\)](#).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaqaan](#).